

Isticmaalayaasha

# Prionelle® iyo Prionelle 28®

(levonorgestrel + ethinylestradiol)

## Kani waa Prionelle/Prionelle 28

Prionelle/Prionelle 28 waa kaniiniga ka hortaga ee kaa illaaliyaa inaad uur yeelatid, lagu siiyay aad u isticmaashid si sax ah. Waxaa loo yaqaan kaniiniga ka hortaga la isku daray, taas oo micnaheeda ah inay wadato labo nooc ee hormoonka, oestrogen (ethinylestradiol) iyo progesterone (levonorgestrel).

## Prionelle/Prionelle 28 wuxuu uga hortagaa sida xigto:

- Ugxan sameynta ma dhacdo.
- Xabka ilmo galeenka wuxuu ahaadaa mid qafiif ah oo ma buuxiyo dhiig, taas oo micnaheeda ah in ukun aysan suurto-galeynin inay ku lifaaqanto.
- Dheecaanka ku jiro ilmo galeenka wuu adkaadaa, oo ku adkeynayo shahwada inay galaan.

## Ka hopr isticmaalida Prionelle/Prionelle 28:

- Si taxadar ah u aqri baakida ee geli baakida.
- La xiriir umulisaadaada ama dhaqtarka haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

## Wareega caadada caadiga ah

Si markaas loo fahmo sida Prionelle/Prionelle u shaqeyso, sidoo kale waa muhiim garanaysid sida wareega caadada u shaqeyso. Hal jeer bishiba, mid ka mid ah ugxan sameynta ayaa siideyso ukun. Xabka ilmo galeenka ayaa diyaariyo nafsadeeda si ay u hesho ukunta iyada oo ka buuxineyso dhiig oo adkaaneyso si markaas ukunta, haddii ay bac-rinto, si ay u hesho nafaqo waxay u baahantahay inay ku korto uurjiifka. Haddii ukunta aysan bac-rimin, waa laga saarayaa kadib 14 maalmood oo wadajir ah oo ay la jiraanxabka ilmo galeenka dhawaan ku aasaasmay caloosha. Dhiis baxa dhacaa waxaa loo yaqaan caado. Caadada caadiga ah waxay socotaa 3-8 maalmood. Wareega caadada oo dhan, ka bilow bilowga dhiiga, caadi ahaan waa 28 maalmood, laakin ku kala duwanyihiin dumarka qaar ee 21 illaa 35 maalmood. Ugxan sameynta waxy qaadan kartaa inta u dhaxeysa 9 iyo 20 ee wareega 28-maalin.


## Saameynada wanaagsan ee kaniiniyada ka hortaga uurka

Marka aad isticmaashid kaniiniyada ka hortaga uurka la isku daray, qul-qulka caadada way yaraataa markii la barbardhigo caadada caadiga ah. Xanuunka caadada iyo ugxan sameynta sidoo kale way yaraataa. Dhacaanka ku adkaaday ilmo galeenka way ku adkeyn kartaa bakteeriyaha inuu dhax maro. Dumarka isticmaalaa kaniiniyada ka hortaga uurka waxay leeyihiin dhoor xaalado ee salpingitis. Dhinaca kale, kaniiniyada ka hortaga ma siiyaan ka hortaga ka soo horjeedo cudurka galmada laga qaado.

## Fiio gaar ah!

Kaniiniyada ka hortaga uurka ma bixiyaan illaalada ka soo horjeedo cudurada galmada laga qaado, marka waa inaad isticmaashaa kondhom sida illaalo dheeraad ah haddii aad la kulantid lamaane cusub.

## Prionelle



Haddii aad bilowdid Tallaado, tusaale ahaan, waa inaad ku bilowdaa kaniiniga ku calaameysan "T1".

Baakida Prionelle waxay wadataa 3 ama 13 baakidaha kaniiniga oo ay la jiraan 21 kaniiniyo midkiiba. Maalmaha isbuuca waxaa lagu qoraa baakida kaniini walba.

## Sida loo isticmaalo Prionelle

- Haddii aad qaadatid kaniiniga ugu horeeyo maalinta koowaad ee caadada, waxaa markii lagaa illaalinayaa uurka. Waxaad sidoo kale ku bilaabi kartaa qaadashada Prionelle maalinta 2-5 ee wareega caadada, laakin waxaad kadib isticmaaleysaa qaabka ka hortaga uurka dheeraad ah (sida kondhomka) ee 7 maalmood ee ugu horeyso.
- Waa inaad la qaadataa kaniiniyada biyo yar ee qiyaastii isla waqtiga maalin walba.
- Ku bilow kaniiniga ee leh maalmaha hadeer ee astaameynta isbuuca. Midaas kadib, raac jaheynta falaaraha oo qaado kaniiniga maalin walba oo 21 maalmood.
- Kadib 21-kaan maalmood, ka naso kaniiniyada oo 7 maalmood. Waxaa caadi ahaan aad la kulmeysaa ka laabashada dhiig baxa 2 illaa 3 maalmood kadib qaadashada kaniiniga ugu dambeeyo. Waad ka illaalsantahay uurka illaa muddada nasiinyada guud.
- Maalinta 8, ku bilow baakida kaniiniga cusub. Waa inaad qaadataa kaniiniga xittaa haddii aad weli dhiig baxeysid. Tani waxay la micna tahay inaad marwalba bilowdid baakida kaniiniga cusub oo isla maalinta isbuuca iyo in aad heleysid caadada qiyaastii isla maalmaha bil walba.

## Prionelle 28



Sanduuqa wuxuu wataa heerarka koolada oo aad ku dhajin kartid dusha baakida si aad u calaameysid kaniiniga ugu horeeyo maalinta saxda ah ee isbuuca. Kaniiniga ugu horeeyo ee saf walba marwalba waa isla maalinta isbuuca sida maalinta bilowga.

Baakida Prionelle 28 waxay wadataa 3 ama 13 baakidaha kaniiniga oo ay la jiraan 28 kaniiniyo midkiiba. 21-ka kaniiniga cadaanka ee ugu horeeyo (safafka 1-3) waxaa ku jiro hoormoonada, iyada oo 7 kaniiniyada jaalaha (safka 4) ma lahan hoormoonada.

## Sida loo isticmaalo Prionelle 28

- Haddii aad qaadatid kaniiniga cad ee ugu horeeyo maalinta koowaad ee caadada, waxaa lagaa illaalinayaa uurka ka bilow maalinta koowaad. Waxaad sidoo kale ku bilaabi kartaa qaadashada Prionelle 28 ee maalinta 2-5 ee wareega caadada, laakin waxaad kadib isticmaaleysaa qaabka ka hortaga uurka dheeraad ah (sida kondhomka) ee 7 maalmood ee ugu horeyso..
- Waa inaad la qaadataa kaniiniyada biyo yar ee qiyaastii isla waqtiga maalin walba.
- Ku bilow kaniiniga safka kore ee astaamaha isbuuca maalin hadeer. Tusaale ahaan, haddii aad bilowdid Tallaado, qaado kaniiniga leh astaanta TIS. Calaamey maalinta bilowga ee heerka koolada ee dusha baakida.
- Raac jaheynta falaaraha illaa aad ka qaadatid dhammaan 28 kaniiniyo. Waxaa caadi ahaan aad la kulmeysaa ka laabashada dhiig baxa 2 illaa 3 maalmood kadib qaadashada kaniiniga cad ugu dambeeyo.
- Maalinta kadib faarujinta baakida kaniiniga, ku bilow mid cusub, xittaa haddii aad weli dhiig baxeysid. Tani waxay la micna tahay inaad marwalba bilowdid baakida kaniiniga cusub oo isla maalinta isbuuca iyo in aad heleysid caadada qiyaastii isla maalmaha bil walba.

Wax badan ka aqri buug-yaraha baakida ee ku saabsan sida loo bilaabo isticmaalida Prionelle/Prionelle 28 kadib dhalashada canuga ama haddii aad horay u isticmaashay ka hortaga uurka hoormoonka kala duwan.

## Su'aalaha inta badan la is weydiyo

### Kawaran haddii aan iloobo qaadashada Prionelle/Prionelle 28?

Halista uurka wuu ugu weynahay haddii aad ilowdid kaniiniga la xiriir mud-dada hoormoonka aan laheyn, tusaale ahaan haddii muddada hoormoonka aan laheyn uu ka dheeryahay 7 maalmood.

- Haddii ka hooseeyo **12 saacadood dhaaftay** tan iyo inta aheyd inaad qaadatid kaniiniga, weli waad ka illaalsantahay uurka. U qaado kaniiniga sida ugu dhaqsaha badan ee aad xasuusatid inaad sidaas sameysid, iyo ku qaado kaniiniga xiggo waqtiga caadiga ah.
- Haddii wax ka badan **12 saacadood ay dhaaftay**, saameynada kaniini-ga ka hortaga uurka waa la yareyn karaa. Raac tilmaamaha hoose:

*Waxaad ilowday wax ka badan 1 kaniini ee baakida kaniiniga:*  
Kala xiriir dhaqtarkaaga/umulisada wixii tallo ah.

*Waxaad ilowday 1 kaniini isbuuca ah 1:*

Qaado kaniiniga ku dhaafay sida ugu dhaqsaha badan ee aad xasuusatid, xittaa haddii ay la micna tahay qaadashada labo kaniini isla waqtiga. Qaado kaniiniga xiggo waqtiga caadiga ah, laakin ha iloobin inaad isticmaashid illaalada ka hortaga dheeraadka ah (sida kondhomka) ee 7-da maalin ee xigto. Haddii galmo sameysay isbuuca ka hor inta aadan iloobin kaniiniga, waxaa jiro halista ah inaad uur qaadi kartid. U sheeg dhaqtarkaaga/umulisa-da isla markiiba.

*Waxaad ilowday 1 kaniini isbuuca ah 2:*

Qaado kaniiniga ku dhaafay sida ugu dhaqsaha badan ee aad xasuusatid, xittaa haddii ay la micna tahay qaadashada labo kaniini isla waqtiga. Qaado kaniiniga xiggo waqtiga caadiga ah. Kaniiniga ka hortaga uurka wuxuu weli leeyahay saameynta la doortay oo uma baahnid wax illaalada ka hortaga dheeraadka ah. Haddii aad ilowdid wax ka badan 1 kaniini, ka hortaga dheeraadka waa in la isticmaalaa 7 maalmood.

*Waxaad ilowday 1 kaniini isbuuca ah 3:*

Haddii aad dooratid mid ka mid ah dooqyada xiggo, uma baahnid illaalada ka hortaga dheeraadka ah:

1. Qaado kaniiniga ilowdid sida ugu dhaqsaha badan ee aad xasuusatid, xittaa haddii ay la micna tahay qaadashada labo kaniini isla waqtiga. Qaado kaniiniga haray waqtiga caadiga ah. Markii baakida kaniiniga ay ebar tahay, bilow baakida xigta isla markiiba iyada oo aan kala go' in kaniiniga (haddii aad isticmaashid Prionelle). Haddii aad isticmaashid Prionelle 28, u bood 7 kaniini ee jaalaha oo bilow islamarkiiba baakida kaniiniga xigto. Malaha ma heleysid wax kalaabasho dhab ah ee dhiigbaxa illaa dhammaadka baakida kaniiniga xiggo. Si kastaba, waxaad heli kartaa calaamadaha iyo dhiigbaxa kala go' maalmaha marka aad qaadatid kaniiniga.

2. *Prionelle:* Dhamey baakida kaniiniga hadeer oo jooji qaadashada kaniiniga oo qiyaastii 7 maalmood, oo ay ku jiraan maalinta aad ilowdo qaadashada kaniini. Kadib kusii wad baakida kaniiniga cusub.

*Prionelle 28:* Islamarkiiba jooji qaadashada kaniiniga firfircoon oo safka 3 oo bilow qaadashada kaniiniga aan hoormoonka laheyn (jaalaha) ee ku jiro safka ugu dambeeyo. Kadib kusii wad baakida kaniiniga cusub.

*1 kaniini ilowday isbuuca 4:*

Haddii aad isticmaashid Prionelle 28, iloobida qaadashada kaniiniga aan laheyn hoormoonka jaalaha ma saameeyo wax ku oolka ka hortaga uurka. Iska tuur kaniiniga jaalaha la iloobay oo qaado kaniiniga xiggo ee waqtiga caadiga ah.

Fiiri gaar ah! Haddii aad ilowdid inaad ka qaadatid kaniiniga baakida kaniiniga oo aadan la kulmin ka laabashada dhiig baxa inta lagu jiro muddada hoormoonka aan laheyn, waxaad qaadi kartaa uur. Kala tasho dhaqtarkaaga/umulisada ka hor inta aadan bilaabin baakida kaniiniga xiggo.

### Kawaran haddii aan rabo inaan badelo maalinta bilowga ee caadadeyda?

*Prionelle:* Tusaale ahaan, haddii dhiig baxaaga caadi ahaan bilowdo Jimcaha oo aad rabtid inaad heshid Tallaadada badelkii, waxaad ku soo gaabin kartaa muddada nasiinyada 3 maalmood. Hubi inaad marnaba u ogolaan nasiinyadaada ee kaniiniga inay jiraan wax ka dheer 7 maalmood.

*Prionelle 28:* Haku qaadan dhammaan kaniiniga safka 4 ka hor inta aadan bilaabin baakida kaniiniga xiggo. Tusaale ahaan, haddii dhiig baxaaga caadi ahaan bilowdo Jimcaha oo aad rabtid inaad heshid Tallaadada badelkii, waxaad bilaabi kartaa baakida kaniiniga cusub 3 maalmood ka hor sida caadiga ah. Ku bilow safka kore oo ay la jiraan kaniiniga cad.

### Ka waran haddii aan rabo inaan daahiyo caadadeyda?

*Prionelle:* Bilow kaniiniga baakida cusub isla markiiba markii baakida hore ay dhammaato – tusaale ahaan, ma jiraan nasiinyo u dhaxeeyo kaniiniga. Sii joogtey inaad qaadatid kaniinigaada ka hortaga haddiiba aad rabtid inaad ka hortagtid caadadaada.

*Prionelle 28:* Markii aad qaadatid kaniiniga ugu dambeeyo oo safka 3, u bood kaniiniga hoormoonka aan laheyn ee jaalaha iyo badelkii bilow isla markiiba baakida kaniiniga cusub ee safka 1. Sii joogtey qaadashada kaniinigaada hoormoonka cad haddiiba aad rabtid inaad ka fogaatid dhiig bax.

### Ka waran haddii aan la kulmo dhiig bax yar?

Dhiig baxa yar wuu dhici karaa oo inta badan waa caadi markii aad bilowdid qaadashada kaniiniga ka hortaga uurka. Halista dhiig baxa aan caadiga aheyn way korodhaa haddii aadan u qaadan si joogta ah kaniinigaada ka hortaga uurka ama haddii aad qaadatid kaniinigaada waqti dheer oo aad ukala baxsan. Haddii dhiig baxa noqdo mid aan raaxo laheyn, ama kaliya imaado dhoor bilood kadib, la xiriir umulisadaada/dhaqtarka.

### Kawaran haddii aan qabo matag ama shuban?

Haddii aad qabtad mataga 3-4 saacadood gudahood kadib qaadashada kaniiniga cad iyo/ama shuban qabtay, waa suurto gal in jirkaaga aysan u suurto galin inuu u qaato hoormoonka sax ah. Mataga ama shubanka kadib, waa inaad qaadataa kaniiniga cad ee cusub ee baakida kaniiniga kale (baakida keydka ah) sida ugu dhaqsaha badan ee suurto gal ka ah. Haddii tani aysan suurto gal aheyn, ama haddii 12 saacadood ay horaan u dhaaftay markii caadi ahaan aad qaadanaysay kaniinigaaga, raac tallada hoose "Ka waran haddii aan iloobo qaadashada kaniiniga?"

### Ka waran haddii aan qaadanayo daawo kale?

Marwalba ogeysii umulisadaada ama dhaqtarka haddii aad qaadanaysid daawo kaloo kale. Isticmaalida kaniiniga ka hortaga oo lagu daray daawooyin kale waxay u hogaamin kartaa yareynta illaalada. Qaar ka mid ah qalajiyayaasha, daawada ee kaniiniga suuxdinta, kaniiniga dhuxusha iyo daawada dabiiciga St. John's wort waa tusaalaha midaan. Waa inaad sidoo kale ka fogaataa cabista juuska miraha canabka, sida ay yareyn karto saameynta kaniiniga ka hortaga uurka.

### Ka waran haddii aan rabo inaan uur qaado?

Haddii aad rabtid inaad uur yeelatid waa inaad buuxisaa baakida aad qaadanaysid laakin haku bilaabin mid cusub. Inta badan dumarka, ugxan sameynta way soo laabataa islamarkiiba kadib markii ay joojiyaan qaadashada kaniinigaada ka hortaga uurka. Laakin waxay sidoo kale qaadan kartaa waqti qaar, waxay ku xirantahay howsha gaarka ah ee ugxan sameynta. Niyada ku hau in dumarka oo dhan ee rabaan inay uur qaadaan waa inay ka fogaadaan tubaakada iyo qamriga oo qaataan dheeraadyada dhiiga soo celiya, tusaale ahaan Natalben Gravid (ka aqri wax badan bogga xiggo).

### Saameynadee caafimaadka ayaan la kulmi karaa?

Saameynada caafimaadka caadiga ah ee dhici karo waxaa ku jiro adkaanta naasaha, dareenka jirada, madax xanuunka, kala go' dhiig baxa ama niyad jabka. Saameynadaan dhinaca caadi ahaan waa qafii iyo caadi ahaan waxay ku baaba'aaan dhoor bilood.

Waxaa jiro saameynada caafimaadka taas oo marmar weli halis ah. Kuwa ka midka ah waxyaabaha kale, waxaa jiro halisa yara sareeyso ee xinjirowga dhiiga ee xididada ama halbowlayaasha, gaar ahaan sannadka koowaad ama markii la isku daro kaniiniga ka hortaga uurka waxaa la isticmaalaa isbuucyada nasiinyada 4 ama ka badan ee xiggo. Halista xinjirowga dhiiga sidoo kale waxay kordhisaa haddii aad qabtid howlgalka weyn ama sariirta jiftid muddo dheer. Degdegyadaan, waa inaad qaadataa nasiinyada kaniiniga ka hortaga uurka.

*Ka taxadar oo la xiriirta dhaqtarka islamarkaasba haddii aad la kulantid kuwa kamid ah aastaamaha xiggo:*

Bararka lama filaanka ama xanuunka kubabkaaga, maqaarka oo midabooda ee lugaha (tusaale ahaan casaanka, gaduudka ama baluuga), isbadelka lama filaanka ah ee araga, gonjabka sida madax xanuunka oo aadan horay u arkin, xanuunka xabadka ama dhibaataada neefsiga, xanuunka daran ee xundhurta, dawaqaada ama dheelitir la'aanta, cuncunka daran ama nabarka.

### Muhiim u ah xasuusta:

- Haddii aad la kulantid wax saameynada caafimaadka, gaar ahaan haddii ay dhab ka tahay ama sii dheeraado, ama haddii caafimaadkaaga isbade- lo oo aad u moodo inay sabab u noqon karto Prionelle/Prionelle 28, la xiriir dhaqtar ama umuliso.

### Miyaan ka fogaan karaa caadadeyda?

Waxaa jiro tallo guud ee aad ku qaadan kartid kaniiniyadaada ka hortaga uurka iyada oo aan jirin wax kala go' ah, laakin kuwaan ma ahan walaac gaar ah ee Prionelle/Prionelle 28. Ma jiraan ka hortaga uurka ee damaanad qaadi karto in gabi ahaanba aad ka madax banaaneysid dhiig baxa. Si kastaba, haddii aad u qaadatid si firfircoon kaniiniyada firfircoon, iyada oo aan jirin wax kala go' ah, qeybaha dhiig baxaada way yaraan kartaa. Waxaad sii joogteyn kartaa kaniiniga firfircoon illaa aad ka dhiig baxdid (dhiig baxa kala go'a). Kadib qaado nasiinyada oo aan ka badneyn 7 maalmood oo ku bilow markale kaniiniyada firfircoon (cadaanka).

Haddii aad qabtid su'aalo kaloo dheeraad ah ama shaki kaaga jiro, la xiriir umulisadaada ama dhaqtarka. Wixii warbixin dheeraad ah aqri nuug-yaraha warbixinta bukaanka ee baakida ku jirto.

## Bilow qaadashada soo celinta dhiiga haddii aad joojiso qaadashada kaniiniyada ka hortaga uurka iyo aad rabsid inaad uur qaadid

Soo celinta dhiiga waxay muhiim u tahay qeybta unuga caadiga ah iyo hormarka maskaxda iyo qeybta xi-didaha ee uurjiifka. Qaadasho aan ku filneyn ee soo celinta dhiiga waxay kordhin kartaa halista helista canuga leh cilada lafdhabarta.

Maamulka Cuntada Qaranka Swedish iyo Guddiga Caafimaadka iyo Fayo qabka Qaranka ku taliyeen dheeraadka 400 garaamo ee soo celinta dhiiga maalin walba. Si loo gaaro saameynta saxda ah, waxaa fikrad wanaagsan ah in la bilaabo qiyaastii hal bil ka hor ka hortaga uurka.

Natalben Gravid waa kaniini nafaqo ee sida gaarka ah loo soo saaray dumarka uurka ah ama qorsheynayo inay uur noqdaan. Natalben Gravid wuxuu wataa soo celinta dhiiga oo firfircoon ee ay ka faa'idi karaan dumarka oo dhan, iyo birta, kiimiko, fitamiin D, omega-3 iyo 14 nafaqo oo si taxadar ah loogu doortay uurleyda.

Dheeraadyada cuntada ma badesho cunto caafimaadan, laakin waa in lagu daraa cunto kala duwan oo dheelitiran iyo hab nololeed caafimaadan.

La hadal umulisadaada ama ka aqri wax badan [www.natalben.se](http://www.natalben.se)

**Prionelle, Prionelle 28** (150 micrograms levonorgestrel, 30 micrograms ethinylestradiol), kaniiniyada, lagu daray kaniiniyada ka hortaga uurka. Rx. F. ATC code G03AA07.

**Tilmaanta:** Ka hortaga uurka.

**Digniinta iyo xadeynada:** Markii aad go'aansaneysid qoraalka daawada ee Prionelle/Prionelle 28, xaqiiqda halista naagta shaqsiga ah waa in la tixgeliyaa, gaar ahaan venous thromboembolism (VTE) oo ay la jiraan Prionelle/Prionelle 28 markii la barbardhigo ka hortagyada kale ee hoormoonka.

**Baakideynta Prionelle:** 3x21, 13x21. Baakidaha oo ay la jiraan 21 kaniiniyo, baakid walba waxay wadataa 21 kaniini cad ee firfircoon.

**Baakideynta Prionelle 28:** 3x28, 13x28. Baakidaha oo ay la jiraan 28 kaniiniyo, baakid walba waxay wadataa 21 kaniiniyada cad ee firfircoon iyo 7 kaniiniyada jaalaha placebo. Dulmarka badeecada la cusbooneysiyyay 31 Luuliyo 2017. Wixii warbixin dheeraad ah, fiiri [www.fass.se](http://www.fass.se) [www.campuspharma.se](http://www.campuspharma.se)

